

## Maxay qabataa ACNC?

ACNC:

- waxay diiwaangelisaa ururada (isticmaalaya macnaha sharciga ah ee deeqbixinta – urur aan faaiido doon ahayn lehna hadaf samafal, kaas oo ah faaiido dadweyne (maaha mid shakhsi)
- waxay caawintaa ururadu inay fahmaan oo buuxiyaan waajibaadkooda iyaga oo siinaya macluumaad, jahayn, talo iyo kaalmooyin kale
- martigelinaya Diiwaan online ah oo laga baari karo ururada diiwaangashan ee Australia
- Waxay samaysaa warbixin ku salaysan 'soo-sheeg mar, isticmaal-inta-badan' si hoos loogu dhigo caqadaha ururada, iyada oo lala shaqaynayo dawlada dhexe, dawlad goboleedyada iyo xukuumadaha territoriga iyo hay'adaha
- Waxay eegaan eedaymaha laga sheeganayo ururada, tusaale ahaan, dareenka ku saabsan wax-is-dhaafinta ama maamul xumo aad u daran.

## Maxayna samayn ACNC?

ACNC ma xeeriso Ururada faaiido-ma-doonka ah (FDM) oo aan ahayn ururada deeqda. Sidoo kale waxaa jira welwel laga soo jeediye ururada aan soo bixi karin masuuliyadkayaga. Tusaale ahaan, badanaa ma baarno khilaafaadka gudaha ee urur, marka laga saaro arrimo aad u xun taas oo laga yaabo inay wax yeesho kalsoonida iyo aaminaada dadweynaha.



## Macluumaad intaas ka badan iyo kaalmo

Waxaa jira siyaalla badan oo aad wax kaga ogaan karto wixii ku saabsan ACNC iyo sida aan ula shaqayn karno ururkaaga:

- booqo ACNC websaytkeeda: oo ah [acnc.gov.au](http://acnc.gov.au)
- tel: 13 ACNC (13 22 62)
- email [advice@acnc.gov.au](mailto:advice@acnc.gov.au)
- u qor adeegyada Talada, ACNC, GPO Box 5108, Melbourne VIC 3001, ama
- fakis u dir: 1300 232 569.

Samayso cinwaanka emailka cusub oo websaytka, ama nagala soco Facebook ama Twitter

### Social media:



Twitter  
[acnc\\_gov\\_au](https://twitter.com/acnc_gov_au)



YouTube  
[acncvideos](https://www.youtube.com/acncvideos)



Facebook  
[acnc.gov.au](https://www.facebook.com/acnc.gov.au)

## Tarjumida Qoraalka iyo Afcelinta iyo Adeega Gubinta Qaranka



TTY - wac 13 36 77 ka dibna weydii 13 22 62 Hadal oo Dhegayso – Wac 1300 555 727 Ka dibna weydii 13 22 62



TIS - wac 13 14 50 weydiina in mutarjum kuu waco 13 22 62



Australian  
Charities and  
Not-for-profits  
Commission



# MA KA SHAQAYSAA URUR FAAIIDO-MA- DOON AH?

Wuxuu noqon karaa urur diiwaangashan

[acnc.gov.au](http://acnc.gov.au)



Ururada Australiyaanka ah ee deeqaha iyo Guddiga Faaiido-Ma-Doonka ah (ACNC) waa hay'ad madaxbanaan oo sharci samayn ah oo Australiyaan ah. Uurada faaiido-ma-doonka ah badankood (FMD) maaha kuwa deeqeed, laakiin kaagu waa ahaan karaa, haddii uu ka diiwaangashan yihiin ACNC.

FMD-gaagu waa laga yaabaa in uu ka diiwaangashan yahay ACNC xataa haddii aadan uga fekerayn 'deeq' ahaan. Ma heshay ka dhaafida cashuurta deeqda inta aan la asaasin ACNC 3dii Diseembar 2012? Haddii ay sidaas tahay, waxaa u aqoonsaday (meelmariyey) Xafiiska Cashuurta Australia (ATO) urur deeq ahaaneed waxaana naloo ka diiwaangeliyey si awtomaatik ah. Is your NFP a registered charity?



Ku raadi FMD-gaaga adiga oo magaca isticmaalaya ama nambarka ganacsiga Australiya (ABN) Diiwaanka ACNC websaytka [acnc.gov.au/findacharity](http://acnc.gov.au/findacharity)

Haddii ururkaaga FMD-ka ahi ka muuqdo Diiwaanka, waa urur 'diiwaangashan'. Haddii aanu ka muuqan aadna aaminsan tahay inuu ka muuqdo, fadlan nala soo xiriir.

Haddii aanu diiwaangashanayn, go'aan ka gaar haddii aad dalban karto inaad diiwaangeliso. Waxaa jira faaiidooyin (kuwaas oo ay ku jirto u dhaafida cashuurta ururka deeqda ee Dawlada Dhexe) in la diiwaangeliyo, laakiin khasab maaha.

## Maxay samaynaayan ururada deeqaha ee diiwaangashani?

Hubi faahfaahinta

Ugu horrayn, hubi in ACNC ay hayso cinwaanka emailka ururkaaga ee hadda ah, kaas oo loo isticmaali doono cinwaan ahaan si loogu soo diro dukumintiyoo haddii aadan tala-kale na siin.

Warbixin iyada oo la soo qadimayo Caddaynta Macluumaadka sanadeed

Urur deeqeed kasta oo diiwaangashan waa inuu u soo qadimaa Caddaynta Macluumaadka Sanadeed ACNC, lix bilood gudahood dhamaadka xilligooda warbixinta.

Hubi mudada warbixinta ee ururka si aad u ogaato markaad soo gudbinayso. Haddii aanay ahayn 1da Juulay ilaa 30ka Juun waa in aad noo sheegtaa.

Caddaynta Macluumaadka Sanadeed wuxuu weydiisanayaa ururkaaga wixii uu samayey sanad dhaqaaleedkii la soo dhaafay, sida ururkaaga shaqadiisu caawintay bulshada, waxayna weydiyaan macluumaadka dhaqaalaha. Macluumaadka aad bixinayso xajmigiisu wuxuu ku xiran yahay inta ururkaagu le'egyahay.

Fahamka Diiwaanka ACNC

Diiwaanka ACNC waa lacag la'aan dadweynuhu ka baari karaan xogta dhamaan ururada ka diiwaangashan ee ACNC. Haddii ururkaagu diiwaanka ku jiro, xubnaha dadweynaha (oo ay ku jiraan kuwa bixiya deeqda iyo tabarucayaasha) ayaa helli kara macluumaad guud oo ku saabsan ururka, sida hadafkeeda deeqbixinta, cidda ka faaiidaysata iyo halka ay ka shaqayso.

Diiwaanka ACNC wuxuu ka kooban yahay macluumaadka ururadu ay ku qoreen Caddaynta Macluumaad Sanadeedka iyo weliba dukumintiyada kale sida dukumintiga maamulida iyo warbixinaha sanadeed. Waxaad dalban kartaa inaad hesho qaar ka mid ah macluumaadka ururka.

U sheegida ACNC Isbedelka ururka

Marka la diiwaangeliyo, waxaa waajiba inaad u sheegto ACNC haddii ururkaaga faahfaahintiisa ugu muhiimsani isbedesho (sida magaceeda ama magacyada kuwa maamulaya) waqti mucayina. Waxaad ka cusboonaysiin

kartaa faahfaahintaada ururka online-ka, waxaana qaadaya sidaha ururka ee ACNC, oo ah [charity.acnc.gov.au](http://charity.acnc.gov.au).

Ilaalinta mudnaanta in la diiwaangeliyo

Waa inaad xaqiijisaa in ururkaagu sii wado xaq u yeelashada in laga diiwaangeliyo ACNC iyada oo:

- sii ahaanaysa faaiido ma doonto
- leh hadaf deeq-fal oo dadweynuhu ka faaiidaysanayaan
- buuxinaysa shuruudaha hanaanka mustawayaasha, iyo
- in aanay lug ku yeellan wax argagixiso ah ama dhaqdhaqaaq kale oo dembiyeed.



Wax badan ka ogow wixii ku saabsan waajibaadka ururada ka diiwaangashan [acnc.gov.au](http://acnc.gov.au), oo hoos imanaysa 'Manage my charity' (maamulida ururkayga).

## Waajibaadka xeeriyayaasha kale

Ururadu waxay sii wadi karaan inay ku leeyihiin waajibaad xeer-samay-yayaal kale iyo hay'ado, sida xeer-samay-yaashaha jimciyadaha midoobay ee territoriga iyo dawlad goboleedka. ACNC waxay u shaqaynaysaa inay isku-duba rido warbixinta iyo hoos u dhigida caqabadaha, tusaale ahaan, iyada oo la aqbalayo warbixinaha qaarkood oo lagu soo gudbiyey hay'adaha kale.



Wax badan ka ogow shaqadayada xagga 'hoos u dhigida caqabadaha' oo ku hoos yaalla 'about ACNC' oo laga hello [acnc.gov.au](http://acnc.gov.au)

## Habka Sharci-samaynta ee ACNC

ACNC way fahamsan tahay in dadka badankiis ku lug leh ururada ay yihiin kuwa daacad ah iskuna deyaya inay sameeyaan wax fiican macaamilkayaguna wuxuu ka bilawdaa xoogsarida waxbarashada iyo isboortiga.

Si degdeg ah oo adag ayaan wax qabanaynaa marka, tusaale ahaan, ay jiraan caddaymo maamulo xumo oo aad u daran, wax isdaba-maryayn ama jebin xeerka ACNC oo gaf weyn ah.